

Sharciga lamba. 37 ee 9 Maarso 1972.

Fulinta Xukunka Dilka

**GUDDOOMIYAHA
GOLAHA SARE KACAANKA**

Marka uu arkay Warqadda Koowaad ee KIIaacaankii 21 Oktoobar 1969;
Marka uu arkay qoraalka oggolaashaha Golaha Sare Kacaanka;

WUXUU MEELMARIYAY

Xeerka soo socd;

Qod. 1

Marka laga soo tago shuruucda u degsan xukunka ciqabta dilka ee Maxkamadaha Caadiga iyo Maxkamadda Badbaadada Dalka, iyo wax ka baddalkooda, Maxkamada Sare (qod. 248 faqradda 12 X.C) iyo Guddoomiyaha Maxkamadda Badbaadada Dalka (qod. 2 ee Dekereetada 28-1-1971 lamba. 17) midkasta iqtisaskeeda marka la eego, waxay wargelinaysaa qoraallada lagu fulinayo amarrada xukunka dilka Guddoomiyaha Gobolka goobtiisa lagu fulinayo xukunka dilka, iyadoo siinaya ogaysiinaya Xeer Ilaaliyaha guud ee Jamhuuriyadda ama kan Maxkamadda Badbaadada Dalka hadba eedaysanaha haddi ay xakumeen Maxkamadaha Caadiga ama Maxkamadda Badbaadada Dalka iyo qaybaha Gobolladeda.

Qod. 2

Guddoomiyaha Gobolka marka ay soo gaarto amarrada kor lagu soo sheegay ayaa qaadaya dhammaan masuuliyadaha ku dhacaya Xeer Ilaaliyaha Guud Dalka ama kan Maxkamadda Badbaadada Dalka kolba xaaladaha jira.

Qod. 3

Ku saabsan codsiyada iyo ka tanasulidda cafiska waa in si dhaqso leh Guddoomiyaha Gobolka shaqada ku leh u gaarsiiyaa xitaa taar ahaan Guddoomiyaha Golaha Sare Kacaanka, isagoo ogaysiis siinaya Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ama Maxkamadda Badbaadada Dalka. Guddoomiyaha Gobolku waa in uu sidoo kale wargaliyaa natiijada codsiga cafiska hay'adaha hadda la soo xusay.

Qod. 4

Xeerkaan wuxuu dhaqangalayaa isla markiiba waxaana lagu faafinyaa Rasmiga Faafinta Rasmiga iyado lagu biirinayo Uruurinta Rasmiga ee Xeerarka iyo Dekereetooyinka, ee Jamhuuriyadda Soomaaliya.

Muqdisho, 9 Maarso 1972.

Guddoomiyaha
Golaha Sare Kacaanka
S. Gaas Maxamed Siyaad Barre